



*Barnaamij la qiimeeyay oo sahan ah*

## AS-AASKA SHAQADA

### HORAY U BILOOW = NATIIJO WANAAGSAN

*Barnaamijka tijaabada ah ee as-aaska shaqada ee loo yaqaan Job Foundation Pilot Program wuxuu bixiyaa taageerooyin shaqo oo badan da'da hore si looga caawiyo ardayda ka gudubka dugsiga sare inay ka baxaan dugsiga iyagoo haysta shaqo markay yihiin da'da 21. Hawshaan waxaa suurtageliyay wadashaqeeyn ka dhexeeysa iskuulada degmooyinka, waaxda horumarinta xirfadaha ee loo yaqaan Division of Vocational Rehabilitation (DVR), Waaxda maaratinta ee dadka naafada koriinka qabo ee loo yaqaan Developmental Disability Administration (DDA), Office of Superintendent of Public Instruction (OSPI), Xafiiska dadka naafada dhanka koriinka qabo ee yaqaan County Developmental Disability, Shaqo bixiyeyaasha iyo kuwa kale.*

#### AS-AASKA SHAQADA

Da'da 19 - 20

(kan labaad ilaa sanadka  
dambe)

Ardaygu wuxuu  
dhammeystiraa warbixin  
as-aaska shaqada  
(Job Foundation) oo uu  
siinayo adeeg bixiye  
aqoon u leh.

#### HORUMARINTA SHAQADA& SHAQO GEEYNTA

Da'da 20 - 21

(sanadka ugu dambeeyaa dugsiga)

Ardayga waxaa loo gudbiyey DVR.  
DVR waxay isku haawshaa furitaanka  
qorshooyinka deyrta sanadka ugu  
dambeeyaa. Sida ugu wanaagsan shaqo  
geeynta waxay dhici doontaa bisha lixaad.

#### XASILINTA

DA'DA 21 - 22

(Bisha lixaad)

Xasilinta  
shaqaalaynta iyo  
isku xirka adeegyada  
shaqaalaynta muddada  
dheer.

### FAA'IIDOOYINKA UGU MUHIIMSAN

- **Warbixinta Job Foundation.** Ardayda uqalma waxay la xiriiri doonaan shaqo bixiyeyaasha qandaraaska leh DDA, ayaga oo cawimaad ka helaya macalinkooda, si loo ogaado xirfadaha, awooda, waxyaabaha ay xiisaynayaan iyo baahiyaha taageerada da'da hore, taasoo kordhineeysa fursadaha ay uga baxaan dugsiga iyagoo shaqo haysta.
- **Khibrad iyo Taageero.** Ka qeyb galayaashu waxay heli doonaan xeeldheerayaasha shaqada iyo taageero, sida tikniyoolajiyadda caawinta, ama caawinaad farsamo, si ay gacan uga geysato abuurista natijjooyinka shaqada oo la wanaajiyey ee dadka u baahan taageero sarayso.
- **Mashruuca Qiimaha leh.** Qof kastaa wuxuu fursad u leeyahay inuu helo as-aasiga shaqada. Waxaa xooga la saarayaa kor u qaadida shaqo helida iyo shaqooyinka bixiya 10 saacadood ama in kabadan usbuucii oo ah shaqo lacagleh looguna talagalay ardayda u baahan taageero sarreeysa.
- **Wadashaqeyn kordhisa natijjooyinka.** Wanaajinta isku xirka ee ka dhaxaysa isbahaysiyada shaqada kaladuwani waxay sare u qaadeysaa takhasuska isbahaysi kasta, waxayna siisaa sii wadida dhammaan nidaamyada adeegga marka ardaygu isu diyaarinayo ka bixitaanka dugsiga.

### MACAAMIISHA U QALANTA

Macaamiisha u qalanta DDA, da'da 19-22, ee ka diiwaangashan dugsiga sare ee degmada oo ka qeyb qaadanaayo mashruucan. Liiska deegaanda ka qeyb galaya, booqo:  
[informingfamilies.org/hs-jobs](http://informingfamilies.org/hs-jobs).